# Jiheynta Maamulka 4.50.031-AD

## Nidaamka Xalinta Cabashada

Sida waafaqsan Xeerka Guddiga 4.50.032-P, jiheyntaan maamulka waxay dajisaa habraac gaar ah ee loogu tallogalay cabashooyinka rasmiga ah ee ardayda, waaladiinta/masuulada iyo dadka dagan Degmada (“cowdaha”). Xeerka Guddiga iyo jiheynta maamulka wax kama qabtaan cabashooyinka la xiriiro goobta shaqada ee ay gudbiyeen shaqaalaha PPS, taasoo aheyd in loo gudbiyo kormeeraha shaqaalaha, ee hogaan kaloo Degmada ah, ama waaxda Shaqaalaha Degmada, waxay ku xirantahay daruufaha.

Degmada waxaa ka go'an inay ku xaliso cabashooyinka rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga aheyn qaab cadaalad ah oo waqtiga ku haboon iyadoo loo marayo nidaam dhinacyadoo dhan, oo ay ku jiraan qoysaska midabka leh iyo bulshooyinka kale ee aan matalaada laheyn, ay ku helayaan fursad ay ku soo bandhigaan aragtidooda oo lagula dhaqmo si ixtiraam oo sharaf leh.

Nidaamka cabashada rasmiga ah waa mid ka mid ah aaladaha loo heli karo in lagu xaliyo dhibaatooyinka iyo arimaha kale ee dugsiga ku saleysan. Degmada waxay ku talo jirtaa in dadaal walba ee loo sameeyo in lagu xaliyo qilaafaadka iyadoo loo marayo nidaamyo aan rasmi aheyn waxaa lagu qeexay hoos.

I. **Cabashooyinka aan rasmiga aheyn - DHIBAATO XALINTA KU SALEYSAN DUGSIGA/WAAXDA** Fasalada, dugsiyada, iyo waaxaha, shaqaalaheena, waaladiinta iyo ardayda waxay si joogto ah uga wada shaqeynayaan xalinta arimaha iyo wanaajiyaan nidaamyadeena loogu abuuro ardayda waaya aragnimada waxbarashada ugu macquulsan. Degmada waxay ku dhiirogelineysaa dhinacyada inay kulmaan si ay ugu gaaraan xalal heerka dugsiga ama waaxda mar walboo suurtogal ah. Iskaashiga noocaan ah ayaa ah qaabka ugu fiican ee lagu xaliyo walaacyada. Waaladiinta iyo ardayda ayaa sidoo kale lagu dhiirogelinayaa inay helaan Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska.

   Haddii walaaca uula xiriiro fasalka/dugsiga:

   A. Cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu marka koowaad si toos ah ula hadlo macalinka ama qofka shaqaalaha ee ku lugleh.
   B. Haddii walaaca aan lagu xalin isgaarsiin toos ah, cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu la hadlo maamulaha dugsiga. Maamulayaasha waxaa laga filanayaa inay si degdeg ah uga jawaabaan cabashooyinka, kuwaasoo ka mid noqon karo shirka qof ahaanta haddii uu codsado dhinac walboo ku lugleh. Haddii walaaca aan lagu xalin ku qanacsanaanta cowdaha ama cowdaha uusan rabin inuu ka qeybgalo xalka aan rasmiga aheyn, waxay u soo gudbin karaan

cabasho rasmi ah Xiriiriyaha Adeegyada Cabashada
degmada. Haddii walaaca uu la xiriiro waaxda degmada:
(1) Cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu marka koowaad si toos ah ula hadlo qofka shaqaalaha ee ku lugleh.
(2) Haddii walaaca aan lagu xalin isgaarsiin toos ah, cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu la hadlo kormeeraha qofka shaqaalaha ah. Kormeerayaasha waxaa laga filanayaa inay si degdeg ah uga jawaabaan cabashooyinka, kuwaasoo ka mid noqon karo shirka qof ahaanta haddii la codsado. Haddii cowdaha uusan hubin qofka kormeeraha ku haboon ah, cowdaha wuxuu caawin kala xiriiri karaa Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska. Haddii walaaca aan lagu xalin ku qanacsanaanta cowdaha ama cowdaha uusan rabin inuu ka qeybgalo xalka aan rasmiga aheyn, waxay u soo gudbin karaan cabasho.

II. Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska

Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska wuxuu u shaqeeyaa sida marinka u dhexeeya qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga si ay uga caawiyaan xalinta walaacyada waalidka ama bulshada. Xiriiriyaha wuxuu diyaar u yahay cowdayaasha inta lagu jiro nidaamka cabashada oo wuxuu kaa caawin karaa inaad si aan rasmi aheyn wax looga qabto cabashooyinka iyo qilaafyada sidoo kale sida ku hagida cowdayaasha nidaamka cabashada rasmiga ah. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska waxaa laga heli karaa halkaan.

III. **Cabashooyinka rasmiga ah - DHIBAATO XALINTA KU SALEYSAN DUGSIGA/WAAXDA**

Walaacyada aanan suurtogaleynin in lagu xaliyo heerka dugsiga ama waaxda ayaa loogu gudbin karaa degmada sida cabasho qoran oo rasmi ah. Tilmaamaha, tallaabooyinka waxqabadka iyo jadwalka waqtiyada waxaa lagu tilmaamay gudaha PPS ee Xeerka Cabashada 4.50.032-P.

Xiriiriyaha adeegyada cabashada PPS waxaa lagala xiriiri karaa 503-916-3462 ama complaintservices@pps.net si ugu jawaabo su'aalahaaga.

## IV. QODOBO DHEERAAD AH

A. Cowdayaasha ayaa laga yaabaa inay ku xareeyaan cabashooyin rasmi ah matalaadooda, matalaada ardaydooda diiwaangashan, ama ku saabsan xeerarka ama dhaqamada Degmada. Cowdayaasha kuma soo xareyn karaan cabashooyin matalaada qof kale ama arday aysan waalid ama masuul u aheyn.

B. Haddii cadeyn cusub oo muhiim ah ee la xiriirta cabashada asalka ah lagu hordhaco Tallaabada 2 ee nidaamka cabashada ee lagu tilmaamay Xeerka 4.50.032-P, cowdaha waxaa dib loogu gudbinayaa Tallaabada 1 iyo cadeynta cusub waxaa loo tixgelinayaa cabasho cusub si loo hubiyo inay jirto fursad ah in si fiican wax looga qabto cadeynta cusub “Cadeymo cusub oo muhiim ah" waa cadeynta bedeli karta natiijada ama baaritaanka Tallaabada 1.

C. Haddii cabasho cusub, oo dheeraad ah lagu sheego Tallaabada 2 ee nidaamka cabashada ee lagu tilmaamay xeerka 4.50.032-P, cabashada cusub ayaa dib loogu celinayaa Tallaabada
1. Cabashooyinka horey wax looga qabtay Talaabada 1 waxay ku sii soconeysaa illaa nidaamka racfaanka.

D. Xaaladaha qaarkood, xeerarka Degmada ama jiheynada maamulka waxay bixiyaan xalin gaar ah oo cabashada ah iyo/ama nidaamka racfaanka. Tusaale ahaan, jiheynta maamulka ee la xiriirto Bedelada Ardayga 4.10.054-AD ayaa aasaasto nidaam kaasoo go'aanada wareejinta ardayga laga racfaan qaadan karo. Xaaladahaan oo kale iyo markii qofka cabashada aan lagu darin baaxada Xeerka 4.50.032-P, habraaca gaarka ah ee lagu tilmaamay xeerka u dhigma waa inuu quseeyaa. Tusaalooyinka meelaha lagu maamulo habraacyada gaarka ah ee cabashada waxaa ka mid ah baaritaanada Title IX, ciyaaraha ardayga, barnaamijyada ardayda guri la'aanta, iyo Xafiiska Adeegyada Nafaqada.

E. Codsiga racfaanka Guddiga waa in loogu gudbiyaa Xafiiska Guddiga 20 maalmood gudahood ee go'aanka Kormeeraha guud.

Waxaa la ansixiyay: 11/2014; La badelay 5/2016; 11/2018; 10/2021